Xisaab Fasalka 3aad

Su'aasha Muhiimka ah ee 1aad:



Maxaan sameyn karaa si aan cunugeyga ugu kaalmeeyo in uu diyaariy u noqdo Xisaabta Fasalka 3aad?

In cunugaada uu kugu kaalmeeyo kariska cuntada, raaco warqadda laga fiiriyo kariska cuntada, iyo baddalo warqadda si aad u dhaqaaleysatid in badan ama in



yar, waxay cunugaada ku kaalmeyn kartaa isku dhufashada, qeybinta, iyo jajabyada.

Cunugaada waa in uu fiiriyo iyo waa in uu kugu kaalmeeyo in aad ogaatid qiyaasta rinjiga loo baahan yahay in la mariyo darbiga, inta cag labo jibbaaran katiifadda loo baahan yahay in la soo iibiyo lana dhigo qolka fadhiga iyo kharashka ku baxa dhigidda katiifadda.

Dhisidda shay? Cunugaada waa in uu qeyb ka qaato farsamada aad isticmaashid si aad u hubsatid in wax kasta toosan yahiin.

Su'aasha Muhiimka ah ee 2aad:

Maxuu baran doonaa cunugeyga sannadka oo idil inta uu ku sugan yahay Xisaabta fasalka 3aad?

Fasalka 3aad, waqtiga waxbarashada waa in ahamiyadda la siiyo afar qeyb oo muhiim ah, (1) horumarinta fahamka isku dhufashada iyo qeybinta iyo xiiladaha isku dhufashada iyo qeybinta ilaa 100; (2) horumarinta fahamka jajabyada (jajabyada la socdo nambarka kore jajabka): (3) horumarinta fahamka dhismaha leydhiyada iyo bedka; iyo (4) sharaxaadda iyo kala dhig dhigga qaababka ka sameysan labada cabbir.

Maxaan ku sameyn karaa guriga si aan u taageero waxa lagu barto dugsiga?

Ha ogaado cunugaada in qalad kasta uu yahay fursad wax lagu barto. Marka cunugaada sameeyo qalad, weydii isaga ama iyada in uu sharaxo sida isaga ama iyada ku timid jawaabtaas, waxaad ku amaantaa fakarka ama talaabadaha saxsan uu qaaday, iyo si qabooban u tilmaan meesha qaladka ka dhacay. Kaddibna cunugaada ha isku dayo masalo la mid ah (waxaad isla meesha ku sameyn kartaa mid) si aad ugu celcelisid fahamka cusub.

Xaqiiqada Fidsan - Isku Darka iyo Kala Goynta

*Ku celceli xaqiiqada fidsan ee isku darka iyo kala goynta, tusaale ahaan

6+7=13 60+70=130 600+700=1300

Buugaag la Wada Akhriyo lagana Doodo:

A Place for Zero, Angeline Sparagna LoPresti

Inta Zero raadinaayo booskiisa, wuxuu ogaaday isla'egyada isku darka iyo isku dhufashada, kaddibna wuxuu sameyay boos hayn.

Math for All Seasons: Mind Stretching Math, Greg Tang

Counting & Arithmetic -- Juvenile Literature

Elevator Magic, Stuart Murphy

Wuxuu sharaxaa fikradda kala goynta, waxaana la adeegsadaa qoraal isku si u dhawaaqa oo ku saabsan wiishka hoos u socda.

*Dhamaan buugaagta la soo qoray waxaa laga heli karaa Maktabyada Dadweynaha Denver (Denver Public Libraries)

Isku Dhufashada iyo Qeybinta

- Weydii cunugaada inta toban (10s) ee ku jirta 30, 50, 100, 1000 iyo sidaa.
- Isticmaal Xaqiiqada Saddax Geeslaha si aad ugu celcelisid xaqiiqada isku dhufashada adiga oo daboola natiijada. Ku ceceli qeybinta adiga oo daboola mid ka mid ah qodobada. Ka samee cayaar kana hel!
- Weydii su'aalo ku lug leh xisaabaadka kooxaha isla'eg. Tusaale ahaan, waxaad tiraahdaa "laabisyada waxay ku jiraan sanduuqyo midkiiba qaado 8. Waxaa jira 3 sanduuq. Intee laabis ayaa ku jira?"*Weydii su'aalo la xariira qeybsiga. Tusaale ahaan, waxaad tiraahdaa "Todobo caruur ayaa qeybsaday 49 kaararka kubadda baseball. Meeqa ayuu heli doonaa cunug kasta? Meeqa ayaa soo hartay?"
- Waxaad cunugaada siisaa masalooyin la xariira qodobo meesha ka maqan xagga ku celicelinta isku dhufashada/qeybinta. Tusaale ahaan, weydii "Maxuu yahay nambarka lagu dhufto 6 ee la'eg 18?"
- Ka saar waxyaabaha yaryar ee kala duwan sida biraha lagu qabto warqadaha ama penniga. U qeybi 3 koox oo isla'eg. Kala hadal "Intee kooxo? Intee ku jirta koox kasta? Intee soo hartay?"

Buugaag la Wada Akhriyo lagana Doodo:

One Grain of Rice: A Mathematical Folktale, Demi

Abaal marin ka kooban hal xabo bariis ayaa maalin kasta laba laabanta ilaa ay gaarto malayiin xabo oo bariis ah marka gabar yar oo tuulo joog ah ka caqli badiso boqor dantiisa jecel.

How Hungry Are You?, Richard Tchen

Caruur badan ayaa safar u tagay dibadda, kaddibna waxay heleen hab ay ku qeybsadaan raashinka ay dhamaan wax ku dareen.

Spaghetti and Meatballs for All! : A Mathematical Story, Marilyn Burns

Fadhiga isu imaashada qoyska ayaa soo adkaaday bacdamaa dadka dib u habeyeen miisaska iyo kuraasta si ay u fadhiisiyaan marti dheeraad ah.

Minnie's Diner: A Multiplying Menu, Dayle Ann Dodds

Sheeko isku si u dhawaaqda oo ku saabsan shan wiil iyo aabahood kuwaasoo halmaama shaqada looga baahan yahay in ay ka qabtaan beerta si ay uga helaan raashin kariska Minnie, halkaas uu mid kasta codsaday labo laab inta uu codsaday midka ka horeeyay.

Amand Bean's Amazing Dream: A Mathematical Story, Cindy Neuschwander

Amanda waxay jeceshahay in ay tiriso wax kasta, balse ma aha ilaa ay ku riyooto riyo la yaab leh, ugu dambeyntiina ogaato in isku dhufashada iyada ku kaalmeyso in ay si degdeg ah wax u tiriso.

The Best of Times: Math Strategies That Multiply, Greg Tang

Dhawaaqyada isku si u dhaca ee fudud waxay kuugu baaqaan sida nambar kasta loogu dhufto eber ilaa toban iyadoo aan kor laga xafidin jadwalka isku dhufashada.

Math Appeal, Greg Tang

Majaajilada isku si loogu dhawaaqo waxay ku siyaan fursad xagga hawlaha xisaabaatka fudud iyo baaqyada ku saabsan xallinta.

Divide and Ride, Stuart Murphy

Wuxuu ku baraa qeybinta marka koox asxaab raacaan mahrajaan kala duwan

Bats on Parade, Kathi Appelt

Habeen ka mid ah habeenada bartamaha kuleylaha, Marching Bat Band ayaa si lama filaan ah u timid, xubnaheedana leysugu geeyay qaabab muujiya isku dhufusho laga soo qaaday labo lagu dhuftay labo ilaa laga gaaro toban lagu dhuftay toban.

Lacagta

Isu geey lacagaha warqadda iyo lacagta birta adiga oo adeegsada lacagta ku jirta boorsadaada ama meelaha la dhigto lacagta jajabka. Cunugaada ha qoro lacagta la muujiyay isaga oo adeegsada calaamadda doolarka iyo dhibicda doolarka. Tusaale ahaan, u soo jeedi 4 doolarka lacagta warqadda, 3 dime, iyo 2 penny. Cunugaada waa in uu qoro $4.32.

Buugaag la Wada Akhriyo lagana Doodo:

Follow the Lacagta, Loreen Leedy

Quarter wuxuu sharaxaa dhamaan siyaabaha loo isticmaalo laga bilaabo marka la soo saaro ilaa dib loogu celiyo bankiga.

Pigs Will Be Pigs, Amy Axelrod

Qoyska baahan ee Pig wuxuu wax ka bartaa lacagta iyo inta ay wax ku iibiso iyaga oo daba gediya guriga kana raadiya lacag ku filan ay casho uga iibsadaan makhaayadda dagmada.

Pigs Go To Market: Fun with Math and Shopping, Amy Axelrod

Fikradao ku saabsan sicirka iyo xisaabta ayaa soo gala sawirka marka Ina Pig ku guuleysato shan daqiiqo ay wax ka iibsato suuqa habeenka Halloween.

If You Made a Million, David Schwartz

Sharax siyaabaha kala duwan ay lacagta qaadan karto, sida lacagta birta, lacagta warqadda, iyo jeegagga qofka, iyo sida loo isticmaalo si wax loogu iibsado, si loo bixiyo deynta, ama kor saar looga qaato bangiga.

The Penny Pot, Stuart Murphy

Qolka rinjieyeynta wijiga ee laga helo carwada dugsiga wuxuu bixiyaa fursado badan oo lagu tiriyo isu geynta laga sameeyo lacagta birta ah marka leysku daro ilaa qonton.

Jajabyada

Kaalmee cunugaada si uu maalin kasta jajab uga arko dunida - xayaysiinta, cabbirka qalabka, warqadaha laga raaco kariska cuntada, iwm.

Cunugaada qalin ha ku raaco shay sida kaarka cayaarta, sanduuq, saxan, koob, qasac, iyo sidaas oo kale. Waxaad sawirka u qeybisaa 4 qeyb oo isla'eg. Weydii cunugaada in uu midabeeyo ¾ qaabka. Balaari fikradaan-u qeybi qeybo isla'eg oo kala duwan kaddibna midabey qeybaha jajabyada kala duwan.

Buugaag la Wada Akhriyo lagana Doodo:

Fraction Action, Loreen Leedy

Ina Prime iyo ardaydeeda xoolaha waxay sahmiyaan isku darka iyaga oo raadiya tusalooyin ku jira dunida ku wareegsan.

If Dogs Were Dinosaurs, David Schwartz

Sahmi fikradaha saamiga iyo qeybaha adiga oo xisaab isla mid ah badiya ama yareeya waxyaabo kala duwan.

The Hershey's Milk Chocolate Bar Fractions Book, Jerry Pallotta

Gabal gabal shukulaatada Hershey ayaa muujisa sida jajabyada u shaqeyaan.

Apple Fractions, Jerry Pallotta

Wuxuu sharaxaa tufaax kala duwan, wuxuuna u adeegsadaa in uu soo bandhigo jajabyada.

Each Orange Had 8 Slices, Paul Giganti

Horudhac muujiya tirinta iyo isku darka fudud.

The Pizza Counting Book, Christina Dobson

Piidsa la qurxiyay ayaa loo isticmaalaa in lagu soo bandhigo tirinta iyo jajabyada. Waxaa ku jira xaqiiqada ku saabsan piidsada.

Full House: An Invitation to Fractions, Dayle Ann Dodds

Jajabka Juvenile Literature

Miisaanka

Magacaaw shay yaala guriga oo laga yaabo in miisaankiisu ka yar yahay 5 bound, 10 bound iyo 20 bound. Haddii aad qabtid miisaanka la dhigto musqusha, waxaad alaabta saartaa miisaanka si aad u ogaatid qiyaastaada.

Buugaag la Wada Akhriyo lagana Doodo:

Millions to Measure, David Schwartz

Sixiroolaha Marvelosissimo wuxuu sharaxaa horumarinta unugyada caadiga ee wax lagu cabbiro, wuxuuna muujiyaa sida ay u fududahay xisaabinta dhererka, joogga, miisaanka, iyo mugga iyada oo la adeegsanaayo siistemka metriga.

Xallinta Masalada

Cunugaada ha sameeyo hana kuu sheego sheekada nambarada ee la socoto isku dhufashada ama qeybinta xaqiiqada aasaasiga. Tusaale ahaan, waxaad tiraahdaa "Bur sokorka wuxuu ku yimaadaa xermo ka kooban 8 . Waxaa jira 3 xermo. Meeqa bur sokor ayaa ku jira?"

Weydii su'aalo ku lug leh qeybsi isla'eg. Tusaale ahaan, “Sagaal cunug ayaa qeybsada 36 warqad oo ka sameysan warqadda midabeysan. Meeqa warqad ayuu cunug kasta qaadan doonaa?" Waxaad kaloo isticmaali doontaa nambaro ay wax ka soo haraan. Kala hadal sida aad u qeybsan doontiin waaxaan soo haray. Waxaa dhici karto in warqadaha loo kala gooyo gabal gabal isla'eg (jajabyo). Badanaa lacagta waxaa loo baddali karaa lacagaha yaryar ee ka samaysan birta, taasoo ka dhigta qeybo desimal ah oo isla'eg. Hase ahatee waa adag tahay in la qeybsado qeybaha buufinta, waxaana loo qoray in ay yahiin "wax soo haray".

Buugaag la Wada Akhriyo lagana Doodo:

Inchworm and A Half, Elinor Pinczes

Dhowr tixri yaryar ayaa isticmaala isbadbaddalka dhererkooda si ay u cabbiraan khudaarta ka baxda beerta

Pigs on the Ball: Fun with Math and Sports, Amy Axelrod

Qoyska Pig ayaa booqday meel yar oo lagu cayaaro golf, kaddibna wuxuu ogaaday qaababka, xagalada, iyo jomitriyada.

Math for All Seasons: Mind Stretching Math, Greg Tang, Counting & Arithmetic -- Juvenile Literature

Math Fables, Greg Tang

Taxane isku si u dhaca oo ku saabsan xoolaha waxay soo bandhigaan tirinta iyo nambarada leysu geeyo, iyo tusalooyin ku saabsan dabeecadaha noocaas sida wada shaqeynta, saaxiibnimada, iyo soo dhaweynta.

A Fair Bear Share, Stuart Murphy

Afar ka mid ah ilmaha oorsada ayaa soo aruuriyay waxyaabaha lagu daro macmacaanka blueberry, iyaga oo tiriya kaddibna dib u tiriya bacdamaa saadkooda soo bato

100 Days of Cool, Stuart Murphy

Afar arday ayaa yimid dugsiga maalinta kowaad iyaga oo heer sare ah, macalinkoodana wuxuu ku adkeyay in ay iska tiiriyaan inta ay tirinayaan boqol maalin ilaa laga gaaro xuska heerka sare ah.

CAYAARAHA GANACSIGA EE KAALMEEYA FAHAMKA XISAABTA

- Uno
- Sideedda Waalan
- Waxaa la heli karaa cayaaro badan oo wanaagsan oo ku shaqeeya elataroonigga.

Kuwaan waxay kaloo kaalmo u yahiin fahamka xisaabta:

- Xujooyinka Jiqsaw:
- Xujooyinka Tangram
- Rummikub
- Clue Junior
- Mancala
- Arday kasta oo ku jira DPS wuxuu leeyahay kood uu ku cayaaro cayaaraha Everyday Math lagana helo internetka www.everydaymathonline.com.
    - Arday kasta wuu heli karaa dhamaan heerarka cayaaraha Everyday Math.
    - Ardayda waxay u baahan yahiin in ay erayga lagu galo (password) ka helaan macalimiintooda.
- Cayaarta Checkers
- Markabka Dagaalka
- Cayaaraha Kaarka Xasuusta
- Isku Xer Afar
- Othello
- Jenga

Su'aasha Muhiimka ah ee 3aad:

Sidee ayaan u kormeeraa waxbarashada iyo horumarka uu gaaro cunugeyga sannad dugsiyeedka? Maxay yahiin ilaha aan isticmaali karo si aan sidaan u sameeyo?

- In aad cayaar la cayaartid cunugaada waxay ku siin doontaa fikrado ku saabsan sida ay wax u qabtaan hawlaha xisaabta loo baahan yahay.
- La fadhiiso cunugaada hana ka hadlo habka uu uga shaqeeyo masalooyinka shaqada guriga.
- Hubso in aad tagtid ballanka shirarka macalinka cunugaada.